# WAA MAXAY KAALMADA KHIDMADA?

Waaxda Parks and Recreation (Baarkaha iyo Madadaaladu) waxay bixisaa fursado madadaalo oo tayo sare leh oo ku yaalla gudaha Bloomington, MN. Waxaanu bixinaa barnaamijyo iyo adeegyo qiimo jaban oo faa'iido u leh caafimaadka jirka, maskaxda, bulshada, iyo shucuurta dareenka.

Kaalmada khidmada waxaa heli kara keli ah dadka ku nool Bloomington. Waa inaad muujiso baahi dhaqaale si aad u hesho kaalmada khidmada ee barnaamijyada iyo adeegyada u qalma.

Waa inaad soo buuxiso arjiga si aad u hesho Kaalmada Khidmada. Arjigaaga waa inay la socdaan waraaqaha saxda ah ee caddaynaya baahida dhaqaale. Qof kasta oo akoonkaaga ku jira wuxuu heli doonaa deeq. Ilmo kasta oo ka yar 18 sano wuxuu heli doonaa $450. Qof kasta oo qaangaar ah oo jira 18 iyo wixii ka weyn wuxuu heli doonaa $40.

Arjigaaga qoraal ahaan ayaan uga soo jawaabi doonaa hal toddobaad gudihii. Deeqdu waxay shaqayn doontaa sanadka kalandarka.

**Waa inaad dib u codsataa Kaalmada Lacagta sanad walba.**

# SIDEEN KU HELAA WARQADAYDA QADADA?

Warqadda Nacfiyada Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Bloomington waxay muujinaysaa in ilmahaagu u qalmo qado bilaash ah ama qiimaha laga dhimay. Si aad u codsato nuqulka warqadaada, ka wac Waaxda Adeega Cuntada: 952-681-6570.

Si aad u hesho nuqul warqad ah oo warqaddaada ah, booqo Xarunta Adeegyada Waxbarashada ee:

Oak Grove Middle School
1350 W. 106th Street, Door C
Bloomington, MN 55431

---

# NALA SOO XIRIIR OO KU SOO CELI ARJIGA:

**Bloomington Parks and Recreation**
**1800 West Old Shakopee Road**
**Bloomington, MN 55431**
parksrec@BloomingtonMN.gov

952-563-8877
952-563-8715 (fax)
MN Relay 711
blm.mn/fee-assist

# KAALMADA KHIDMADA EE BAARKAHA IYO MADADAALADA BLOOMINGTON

barnaamijyada iyo adeegyada u qalma



CITY OF BLOOMINGTON MINNESOTA
PARKS AND RECREATION

## SIDEEN U CODSADAA?

Buuxi Arjiga Kaalmada Khimada. U soo dir arjigaaga iyo dukumentiyada maaliyadeed ee loo baahan yahay Waaxda Baarkaha iyo Madadaalalada.

## GOORMAAN CODSAN KARAA?

Qoysaska cusub iyo kuwa ku soo laabanaya Kaalmada Khidmadu waxay codsan karaan wakhti kasta.

**MUHIIM:** Waa in laguu ogolaado Kaalmada Khidmada kahor inta aanad isu diiwaangelinin waxqabadyadeena. Ma ogolin soo celinta ama wax ka bedelaada iibsi hore.

## SIDEE AYAAN KU HELI KARAA QIIMO DHIMISTAYDA?

La sug inaan aad isu diiwaangeliso ilaa aan ka xaqiijino in codsigaaga la aqbalay. Ka dib marka lagu ogolaado, waxaad si toos ah akoonkaaga ugu heli doontaa deeqda waxbarasho ee baarkaha iyo madadaalalada.

Si aad internetka isaga diiwaangeliso, booqo:
blm.mn/register-online

Ama, buuxi foomka diiwaangelinta ee warqad oo ku soo dir e-mail, fakis, boostada ama shakhsi ahaan u keen.

## SIDEEN KU OGAAN KARAA INAAN CODSAN KARO?

Waxaan ku go'aamineynaa u qalmitaanka iyadoo ku salaysan foomamka aad soo gudbiso. Waa inaad keento mid ka mid ah Liiska A, ama mid ka mid ah Liiska B iyo Liiska C.

| **Liiska A**<br>Dukumentiyada go'aamiya xaalada dhaqaale iyo baahida dhaqaale. | **Liiska B**<br>Dukumentiyada muujinaya xaaladda maaliyadeed. | **Liiska C**<br>Dukumentiyada go'aamiya baahida dhaqaale. |
|---|---|---|
| 1. Warqadda ansixinta Nacfiyada Waxbarashada ee sannad dugsiyeedka hadda. | 1. Kaalmada dhaqaale ee degmada, sida SNAP ama Gargaarka Caafimaadka. | 1. Warqad taariikhaysan oo ku saabsan ka joojinta shaqada. |
| 2. Canshuur celinta federaalka ee sannadkii hore oo ay la socoto laba bilood oo dakhli ah. | 2. Dakhliga ku salaysan Sooshal Sakuuratiga (tusaale Nacfiyada Naafonimada ama Kaabista; Dheefaha Sooshal Sakuuratiga ee Hawlgabku uma qalmaan). | 2. Dukumentiga carruurta la korsaday ama korinta ku meelgaarka ah. |
| | 3. Jeega dabadiisa ee saddexdii bilood ee ugu dambeeyay ee dakhliga. | 3. Warqad ka timid Ilaaliyaha Maxkamadu Magacawday (Guardina Ad Litem) ee la shaqeynaya qoyska. |
| | 4. Bayaanka bangiga oo muujinaya saddex bilood oo isha dakhliga ah. | 4. Warqad qoran oo sharxaysa duruufo maaliyadeed oo khaas ah. |
| | 5. Dakhliga masruufka ilmaha iyo lacagaha masruufka xaaska. | |
| | 6. Bayaanka shaqo la'aanta. | |

- Dakhligu wuxuu ku salaysan yahay mushaharka guud.
- Haddii aad caawimo ka hesho Sooshal Sakuuratka, fadlan soo qaado caddaynta xaalada dhaqaalahaaga. Waxaad wici kartaa 1-800-772-1213 si aad u codsato soo daabicitaanka.
- Haddii aad caawimo ka hesho Degmada Hennepin, fadlan soo qaado caddaynta dakhligaaga bishii. Waxaad wici kartaa shaqaalaha maaliyada ee degmada Hennepin si aad u codsato macluumaadkan.

## MACLUUMAADKAYIGA MA QARSOODI BAA?

Haa. Wax kasta oo aad soo dirto waa qarsoodi.
Kaliya shaqaalaha muhiimka ah ayaa arki doona macluumaadkaaga.

## MACLUUMAADKA LACAG BIXINTA

Haddii laguu ogolaado kaalmaynta kharashka, waa inaad weli bixiso qayb ka mid ah khidmada barnaamijka markaad isdiiwaangeliso. Isma diiwaan gelin kartid haddii akoonkaaga deyn lagu leeyahay (tusaale, jeeg lagugu soo celiyay). Waa inaad bixiso wixii deyn ah si aad uga qaybgasho barnaamijyada Baarkaha iyo Madadaalalada.